فَنِعْمَ ٱلْمَوْلَىٰ وَنِعْمَ ٱلنَّصِيرُ ﴿٧٨﴾

can Sayid isagaana u Fiican Gargaare.

Eebe isagaa Og Meejuu wax ka Diri iyo Cidduu Diri iyo Cidda loo Diriba, Siduu wax walba u Ogyahay. Tan kale wuxuu Fari Eebe in Salaadda la Oogo Eebana si Dhab ah loo Caabudo, Khayrkana la Falo si loo Liibaano, Dar Eebana loo Jahaado, Illeen Ilaahaybaa Dooray Ummaddan Muxamadiyadee, Dhibna ma Yeelin Diintii, waxay waafaqsantahay Diintii Nabi Ibraahim, Ilaahaybaana Muslimiin nagu Magacaabay mar hore, iyo Quraankaba.
Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Marag Buu noo yahay Ummadduna waa Maragga Dadka kale, waase in Salaadda la Oogo, Zakadana la Bixiyo, lana Qabsado Xadhigga Eebe,Illeen isagaa Sayidkeena iyo Gargaaraheenna ah una Wanaagsan gargaaree, waana Kaas Islaam-ka Toosan oo Wanaag, Islaanimo, Xumaan ka tagid iyo Samo fal ah, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabad-galyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Ruuxii u Yeedha Yeedhid Jaahiliyo wuxuu Dhex fadhiisan Jahannamo, Markaasuu Nin Yidhi Rasuulka Eebow Haba Soomo oo Tukado? Markaasuu Yidhi Haba soomo oo Tukado'u Yeedha Eebaha oo ah inuu idinku Magacaabay Muslimiin Addoomada Eebow.
Al-Xajj (75-78).

# Suurat Al-Mu'minuun

# سُورَةُ المُؤْمِنُونَ

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

قَدْ أَفْلَحَ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿١﴾

1. Waxaa Dhab ahaan u Liibaanay Mu'miniinta.

ٱلَّذِينَ هُمْ فِي صَلَاتِهِمْ خَٰشِعُونَ ﴿٢﴾

2. Ah kuwa Salaaddooda ku Khushuuca.

وَٱلَّذِينَ هُمْ عَنِ ٱللَّغْوِ مُعْرِضُونَ ﴿٣﴾

3. Oo ah kuwa Hadalka Macno Darro ka Jeedsada.

وَٱلَّذِينَ هُمْ لِلزَّكَوٰةِ فَٰعِلُونَ ﴿٤﴾

4. Oo ah kuwa Fala Zakada « bixiya ».

وَٱلَّذِينَ هُمْ لِفُرُوجِهِمْ حَٰفِظُونَ ﴿٥﴾

5. Oo ah kuwa Furuujtooda Ilaaliya.

إِلَّا عَلَىٰٓ أَزْوَٰجِهِمْ أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَٰنُهُمْ فَإِنَّهُمْ غَيْرُ مَلُومِينَ ﴿٦﴾

6. Haweenkooda iyo waxay Hanatay Gacantoodu mooyee, laguma Dagaalo Taas.

فَمَنِ ٱبْتَغَىٰ وَرَآءَ ذَٰلِكَ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْعَادُونَ ﴿٧﴾

7. Ruuxiise Doona waxaas wax ka Soo Hadhay kuwaasu waa Xad Gudbayaal.

وَٱلَّذِينَ هُمْ لِأَمَٰنَٰتِهِمْ وَعَهْدِهِمْ رَٰعُونَ ﴿٨﴾

8. Waa kuwa Ammaanadooda iyo Ballankooda Dhawra.

وَٱلَّذِينَ هُمْ عَلَىٰ صَلَوَٰتِهِمْ يُحَافِظُونَ ﴿٩﴾

9. waana kuwa Salaadda Ilaaliya.

10. Kuwaasu waa kuwa Dhaxli.

أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْوَٰرِثُونَ ١٠

11. oo ah kuwa Dhaxli Firdowsa way-na ku Dhexwaari.

ٱلَّذِينَ يَرِثُونَ ٱلْفِرْدَوْسَ هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ١١

**Suuraddan waxaa lagu Magacaabaa Suuratul Mu'minuun, waxayna ku Billaabatay Liibaanta Mu'miniinta ku Khushuuca Salaadda, oo Macna la'aantahadal ah-ka Jeedsada, oo Zakada Fala, oo iska Dhawra waxaan Eebe u Xalaalayn, oo Amaanada iyo Ballankooda ilaaliya, Salaaddana ilaaliya, kuwaa-suna waa uun kuwa Dhaxli Janada Fardowsa kuna Waari Dhexdeeda. Wana Taas Tilmaanta Dhabta ah ee Ruuxa Mu'minka ah ee Mudan Liibaan iyo Jannada Eebe, waana Liibaan Aan wax lamid ah jirin. Caa'isha Eebe ha ka raalli Noqdee waxaa la warsaday Dabeecaddii Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waxayna Tidhi: Dabeecaddiisu waxay ahayd Quraanka, waxayna Akhriday billowga Suuraddan tan iyo Aayadda Sagaalaad. Mana Qarsoona Wanaagga Salaadda, Bixinta Zakada, ka Jeedsashada Hadal Macno Darro, ka Fogaanshaha Zinada, Ilaalinta Ammaanada iyo Ballanka iyo Wanaagga ku Dadaalka. Al-Mu'minuun (1-11).**

---

12. Waxaan ka Abuuray Dadka wax laga soo Soocay Dhoobo.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ مِن سُلَٰلَةٍ مِّن طِينٍ ١٢

13. Markaasaan ka Yeellay Dhibic ku Jirta meel Sugan.

ثُمَّ جَعَلْنَٰهُ نُطْفَةً فِى قَرَارٍ مَّكِينٍ ١٣

14. Markaasaan ka Abuuray Dhi-bicdii Calaqo kana Abuuray Calaqadii Goosin, kana Abuuray Goosintii Lafo oon Huwinnay Lafihii Hilib Mar-kaasaan ka ahaysiinay Khalqi kale, wa-xaa Khayr Badnaaday Eebaha Abuur-kiisu Fiicanyahay.

ثُمَّ خَلَقْنَا ٱلنُّطْفَةَ عَلَقَةً فَخَلَقْنَا ٱلْعَلَقَةَ مُضْغَةً
فَخَلَقْنَا ٱلْمُضْغَةَ عِظَٰمًا فَكَسَوْنَا ٱلْعِظَٰمَ
لَحْمًا ثُمَّ أَنشَأْنَٰهُ خَلْقًا ءَاخَرَ فَتَبَارَكَ ٱللَّهُ
أَحْسَنُ ٱلْخَٰلِقِينَ ١٤

15. Markaas Idinku Arrintaas ka Dib waad Dhimanaysaan.

ثُمَّ إِنَّكُم بَعْدَ ذَٰلِكَ لَمَيِّتُونَ ١٥

16. Markaas Maalinta Qiyaame Lay-din soo Bixin.

ثُمَّ إِنَّكُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ تُبْعَثُونَ ١٦

17. Waxaana ku Abuuray Korkiinna Toddobo Samo mana nihin mid Khal-qiga Halmaansan.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا فَوْقَكُمْ سَبْعَ طَرَآئِقَ
وَمَا كُنَّا عَنِ ٱلْخَلْقِ غَٰفِلِينَ ١٧

**Aayadahanna waxay Caddayn Dadka Asalkiisa iyo Sida Eebe u Abuuray una soo Mareen Abuur kala Duwan, waxaana wayn oo Ammaan Muta Xumaanna ka Dheer Ilaaheenna Wanaajiya Abuurka, Mar-kaas ka Dibna wuu Dilaa,wuxuuna soo Bixiyaa Maalinta Qiyaame, waana kan ahaysiiyey Korkooda Toddobo Samo oon Halmaansaneyn Khalqiga. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Eebe wuxuu ka Abuuray (Nabi) Aadam ka Soo qaad Dhulkoo Dhan,waxayna ahaadeen Carruurtiisu sida Dhulka, Mid Cas, mid Cad mid Madow iyo mid u Dhexeeya iyo mid Fiican iyo mid Xun iyo mid u Dhexeeya. Al-Mu'minuun (12-17).**

---

18. Waxaan ka soo Dejinay Samada Biyo Qiyaasan, waxaana Dejinay dhul-ka inaan la Tagnana waan karraa.

وَأَنزَلْنَا مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءًۢ بِقَدَرٍ فَأَسْكَنَّٰهُ
فِى ٱلْأَرْضِ ۖ وَإِنَّا عَلَىٰ ذَهَابٍۭ بِهِۦ لَقَٰدِرُونَ ١٨

19. Waxaana idinku Ahaysiinnay Beero Timir ah iyo Cinabyo oo Dhexdeeda Khudaar Badani ku sugantahay ood wax ka Cuntaan.

فَأَنشَأْنَا لَكُم بِهِۦ جَنَّٰتٍ مِّن نَّخِيلٍ وَأَعْنَٰبٍ
لَّكُمْ فِيهَا فَوَٰكِهُ كَثِيرَةٌ وَمِنْهَا تَأْكُلُونَ ١٩

20. Iyo Geed ka Baxa Dhuur Siina oo soo saarta Subag iyo Koosaar kuwa Cuni.

وَشَجَرَةً تَخْرُجُ مِن طُورِ سَيْنَآءَ تَنۢبُتُ بِٱلدُّهْنِ
وَصِبْغٍ لِّلْءَاكِلِينَ ٢٠

21. Waxaa idiinku Sugnaaday Xoolaha Waano, waxaana idinka Waraabinnaa waxa Caloosheeda ku Sugan waxaana idinku Sugan Manfaco badan, Xaggeedaadna wax ka Cuntaan.

وَإِنَّ لَكُمْ فِى ٱلْأَنْعَٰمِ لَعِبْرَةً ۖ نُّسْقِيكُم مِّمَّا فِى بُطُونِهَا
وَلَكُمْ فِيهَا مَنَٰفِعُ كَثِيرَةٌ وَمِنْهَا تَأْكُلُونَ ٢١

22. Korkeeda iyo Markabka Korkiisa yaana laydinku Xambaaraa.

وَعَلَيْهَا وَعَلَى ٱلْفُلْكِ تُحْمَلُونَ ٢٢

23. Waxaan u Dirray (Nabi) Nuux Qoomkiisii wuxuuna Yidhi Qoomkayow Caabuda Eebe idiinma sugnaanin Ilaah ka soo Hadhaye, miyeydaan dhawrsanayn.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِۦ فَقَالَ يَٰقَوْمِ
ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥٓ ۚ أَفَلَا تَتَّقُونَ ٢٣

24. Waxayna Dheheen Madaxdii Gaalowday oo Qoomkiisa ahaa kanu ma aha waxaan Dad idin la midah ahayn, wuxuuna doonayaa inuu idinka Fadilmo, Hadduu Doono Eebe wuxuu soo Dejinlahaa Malaa'ig, manaan ka Maqlin Arrintan Aabayaalkanagii Horeeyey.

فَقَالَ ٱلْمَلَؤُا۟ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن قَوْمِهِۦ مَا هَٰذَآ
إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ يُرِيدُ أَن يَتَفَضَّلَ عَلَيْكُمْ
وَلَوْ شَآءَ ٱللَّهُ لَأَنزَلَ مَلَٰٓئِكَةً مَّا سَمِعْنَا
بِهَٰذَا فِىٓ ءَابَآئِنَا ٱلْأَوَّلِينَ ٢٤

25. Ma aha waxaan Nin Waalan ahayn ee Suga Tan iyo Muddo, Geerida.

إِنْ هُوَ إِلَّا رَجُلٌۢ بِهِۦ جِنَّةٌ فَتَرَبَّصُوا۟ بِهِۦ
حَتَّىٰ حِينٍ ٢٥

Waxaa Awoodda Eebe iyo Qudradiisa ka mid ah Roobka uu Samada ka keeno markaas Dhulka ku Kaydiyo Hadduu Doono uu kaxayn karo, kuna soo Bixiyo Beero wax laga Cuno, sida Geedka Subagga leh ee Siina oo kale, Xoolahana Eebaa inoogu Nicmeeyey. Aayadaha kalena waxay ka warrami Nabi Nuux iyo Qoomkiisii, iyo Siday u Beeniyeen, wax badan yuuna Quraanku ka Qisooday waxaase Muhiim ah in laga Leexdo Jidka kuwa Xun lana Raaco Xaqa iyo Wanaagga. Al-Mu'minuun (18-25).

---

26. Wuxuu yidhi Eebow iiga Gargaar Beenintooda.

قَالَ رَبِّ ٱنصُرْنِى بِمَا كَذَّبُونِ ٢٦

27. Waxaana u waxyoonay ku Samee Doon Ilaalintanada iyo Waxyiganaga,

فَأَوْحَيْنَآ إِلَيْهِ أَنِ ٱصْنَعِ ٱلْفُلْكَ بِأَعْيُنِنَا وَوَحْيِنَا

فَإِذَا جَآءَ أَمۡرُنَا وَفَارَ ٱلتَّنُّورُ فَٱسۡلُكۡ فِيهَا
مِن كُلٍّ زَوۡجَيۡنِ ٱثۡنَيۡنِ وَأَهۡلَكَ إِلَّا مَن سَبَقَ
عَلَيۡهِ ٱلۡقَوۡلُ مِنۡهُمۡۖ وَلَا تُخَٰطِبۡنِي فِي ٱلَّذِينَ ظَلَمُوٓاْ
إِنَّهُم مُّغۡرَقُونَ ٢٧

markuu yimaado Amarkanagu oo Burqado Tanuurku,Gali Doonta Nooc kastaba Labo Labo iyo Ehelkaaga Ciddii Hadal u Hor maray (Halaag) mooyee oo ka mid ah Haygulana Hadlin (Xaalka) kuwa Dulmiga falay iyaga waa la Maanshayne.

فَإِذَا ٱسۡتَوَيۡتَ أَنتَ وَمَن مَّعَكَ عَلَى ٱلۡفُلۡكِ فَقُلِ ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ
ٱلَّذِي نَجَّىٰنَا مِنَ ٱلۡقَوۡمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ٢٨

28. Markaad Korto Adiga iyo inta kula Jirta Doonta waxaad Dhahdaan Mahad Eebaa iska leh ah kan iga koriyey Qoomka Daalimiinta ah.

وَقُل رَّبِّ أَنزِلۡنِي مُنزَلٗا مُّبَارَكٗا وَأَنتَ خَيۡرُ ٱلۡمُنزِلِينَ ٢٩

29. Waxaadna Dhahdaa Eebow I daji Guri la Barakeeyey Adaa u Khayrroon Dejiyee.

إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ وَإِن كُنَّا لَمُبۡتَلِينَ ٣٠

30. Arrintaasna waxaa ku Sugan Aayaad waxaana nahay kuwo wax Imtixaama.

Wuxuuna ku Dhammaaday Xaalkii kuwaas in Biyo lagu Halaagay, Eebana koriyey Nabi Nuux iyo Intii Rumaysay, taasina waa Sunada Eebe iyo Imtixaamkiisa, Qisaduna waxay aad ugu Faah Faahsantahay Suuradda Huud, waxayna ku Tusin Lagdanka Xaqa iyo Xumaanta'Tan iyo Waqtigii Nabi Nuux iyo inaan la waayeyn Xaqdiidayaal Xumaanta Jecel oo Wanaagga Neceb, waxaase Hadhi Wanaagga iyo Khayrka'Waxaana Tagi Xumaanta iyo Gaalimada iyo Kibirka. Al-Mu'minuun (26-30).

---

ثُمَّ أَنشَأۡنَا مِنۢ بَعۡدِهِمۡ قَرۡنًا ءَاخَرِينَ ٣١

31. Markaasaan ahaysiinay Gadaashood Qarni kale.

فَأَرۡسَلۡنَا فِيهِمۡ رَسُولٗا مِّنۡهُمۡ أَنِ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ
مَا لَكُم مِّنۡ إِلَٰهٍ غَيۡرُهُۥٓۚ أَفَلَا تَتَّقُونَ ٣٢

32. Waxaana u Dirray Dhexdooda Rasuul ka mid ah Caabuda Eebe idiinma sugna Ilaah Eebe ka soo Hadhay ee Miyeydaan Dhawrsanayn.

وَقَالَ ٱلۡمَلَأُ مِن قَوۡمِهِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ وَكَذَّبُواْ بِلِقَآءِ
ٱلۡأٓخِرَةِ وَأَتۡرَفۡنَٰهُمۡ فِي ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا
مَا هَٰذَآ إِلَّا بَشَرٞ مِّثۡلُكُمۡ يَأۡكُلُ مِمَّا تَأۡكُلُونَ مِنۡهُ
وَيَشۡرَبُ مِمَّا تَشۡرَبُونَ ٣٣

33. waxay Dheheen Madaxdii Qoomkiisa ee ah kuwii Gaaloobay oo Beeniyey la Kulanka Aakhiro oon ugu Raaxaynay Nolosha Dhaw, kani ma aha waxaan Dad idinla mid ahayn Cunina waxaad Cunaysaan,Cabbina waxaad Cabbaysaan.

وَلَئِنۡ أَطَعۡتُم بَشَرٗا مِّثۡلَكُمۡ إِنَّكُمۡ إِذٗا لَّخَٰسِرُونَ ٣٤

34. Haddaad Adeecdaan Dad idila mid ah idinku waa Khasaarteen.

أَيَعِدُكُمۡ أَنَّكُمۡ إِذَا مِتُّمۡ وَكُنتُمۡ تُرَابٗا وَعِظَٰمًا
أَنَّكُم مُّخۡرَجُونَ ٣٥

35. ma wuxuu idiin Yaboohi Markaad Dhimataan ood Noqotaan Carro iyo Lafo in laydin soo Bixin.

36. Waa Fogtahay oo Fogtahay waxa laydinku Goodin.

۞ هَيْهَاتَ هَيْهَاتَ لِمَا تُوعَدُونَ ﴿٣٦﴾

37. Ma aha waxaan Noloshanada Adduunyo ahayn, waanu Dhiman (Qaar) oonnu Noolaan (Qaar) kuwa la soo Bixinna ma Nihin.

إِنْ هِيَ إِلَّا حَيَاتُنَا الدُّنْيَا نَمُوتُ وَنَحْيَا
وَمَا نَحْنُ بِمَبْعُوثِينَ ﴿٣٧﴾

38. Mana aha waxaan Nin ku Been Abuurtay Eebe ahayn, mana nihin kuwo u Rumeyn.

إِنْ هُوَ إِلَّا رَجُلٌ افْتَرَىٰ عَلَى اللَّهِ كَذِبًا
وَمَا نَحْنُ لَهُ بِمُؤْمِنِينَ ﴿٣٨﴾

39. Wuxuuna yidhi Eebow iiga Gargaar Beenintooda.

قَالَ رَبِّ انصُرْنِي بِمَا كَذَّبُونِ ﴿٣٩﴾

40. Wuxuu yidhi Eebe Mudda Yar ka Dib yey ahaan kuwo Nidaamooda*.

قَالَ عَمَّا قَلِيلٍ لَّيُصْبِحُنَّ نَادِمِينَ ﴿٤٠﴾

41. Waxaana ku Qabatay si Xaq ah Qaylo waxaana ka yeellay Daadxoor ee Fagaansho Haw Sugnaado Daalimiinta.

فَأَخَذَتْهُمُ الصَّيْحَةُ بِالْحَقِّ فَجَعَلْنَاهُمْ غُثَاءً ۚ
فَبُعْدًا لِّلْقَوْمِ الظَّالِمِينَ ﴿٤١﴾

Nabi Nuux Gadaashiis wuxuu Eebe Diray Rasuullo kale, waxaana beeniyey qoomkoodii iyagoo Sheegi inay la mid yihiin una Noolyihiin siday u Nool yihiin, oy Diideenna soo Bixinta iyo Qiyaamada, Nabiguna ay Xumaan ku Sheegeen'wuxuuse Beryaye Eebe'waxaana ku Dhacay Gaaladii Halaag, taasina waa Abaalka Gaalada Xaqa Diida ee Daalimiinta ah, oo ku Dambayn Qoomamo iyo Khasaare. Al-Mu'minuun (31-41).

* Shallaaya (dib u eegaha).

---

42. Markaasaan Ahaysiinay Gadaashood Quruumo kale.

ثُمَّ أَنشَأْنَا مِن بَعْدِهِمْ قُرُونًا آخَرِينَ ﴿٤٢﴾

43. Kamana hor marto Ummadi Ajasheeda (Waqtigeeda) kamana Dib marto.

مَا تَسْبِقُ مِنْ أُمَّةٍ أَجَلَهَا وَمَا يَسْتَأْخِرُونَ ﴿٤٣﴾

44. Markaasaan Diray Rasuulladanadii oo Israacsan markastooy Ummad u Yimaaddo Rasuulkoodu waybeeniyaan, waxaana Raacsiinay Qaarkood Qaar (Halaag) waxaana ka yeelay Sheeko Fogaanshaana u Sugnaaday Qoomaan (Xaqa) Rumeyn.

ثُمَّ أَرْسَلْنَا رُسُلَنَا تَتْرَىٰ ۖ كُلَّ مَا جَاءَ أُمَّةً رَّسُولُهَا كَذَّبُوهُ ۚ
فَأَتْبَعْنَا بَعْضَهُم بَعْضًا وَجَعَلْنَاهُمْ
أَحَادِيثَ ۚ فَبُعْدًا لِّقَوْمٍ لَّا يُؤْمِنُونَ ﴿٤٤﴾

45. Markaasaan la Diray (Nabi) Muuse iyo Walaalkiis Haaruun Aayadkanagii iyo Xujo Cad.

ثُمَّ أَرْسَلْنَا مُوسَىٰ وَأَخَاهُ هَارُونَ بِآيَاتِنَا
وَسُلْطَانٍ مُّبِينٍ ﴿٤٥﴾

46. Xagga Fircoon iyo Jameecadiisii (yaana u dirray) wayna is kibriyeen waxayna ahaayeen Qoom is korraysiiya.

إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَمَلَإِيْهِۦ
فَٱسْتَكْبَرُوا۟ وَكَانُوا۟ قَوْمًا عَالِينَ ﴿٤٦﴾

47. waxayna dheheen ma waxaanu u rumayn Labo ruux oo nala mid ah Qoomkooduna anaga na Caabudo.

فَقَالُوٓا۟ أَنُؤْمِنُ لِبَشَرَيْنِ مِثْلِنَا
وَقَوْمُهُمَا لَنَا عَٰبِدُونَ ﴿٤٧﴾

48. Wayna Beeniyeen waxayna Noqdeen kuwo la Halaagay.

فَكَذَّبُوهُمَا فَكَانُوا۟ مِنَ ٱلْمُهْلَكِينَ ﴿٤٨﴾

49. Waxaana Siinay (Nabi) Muuse Kitaabka inay Hanuunaan.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ لَعَلَّهُمْ يَهْتَدُونَ ﴿٤٩﴾

50. Waxaana ka yeellay ina Maryamna iyo Hooyadiis Aayad waxaana u Dunnay Meel sare oo Sugnaansho iyo Biyo Socda leh.

وَجَعَلْنَا ٱبْنَ مَرْيَمَ وَأُمَّهُۥٓ ءَايَةً وَءَاوَيْنَٰهُمَآ
إِلَىٰ رَبْوَةٍ ذَاتِ قَرَارٍ وَمَعِينٍ ﴿٥٠﴾

**Markaas ka Dibna waxaa Yimid Quruumo kale. oo midna ayna ka hor mari karin kana dib mari karin Waqtigeeda, waxaana loo soo Diray Rasuulllo si is raacsan,oo mar kasta la beenin jiray, waase laCiqaabay Beeniyayaashii, markaasaa Eebe Diray Nabi Muuse iyo Haaruun'wixii Dhexmaray isaga iyo Fircoonna wax badan yuu Quraanku ka warramay waase in lawaano Qaato.**
**Sidoo kale Nabi Ciise iyo Hooyadiisna waa in lagu Waano qaato. Al-Mu'minuun (42-50).**

---

51. Rasuullow ka Cuna Xalaasha,Falana Wanaag,Anigu waxaad Falaysan waan Ogahaye.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلرُّسُلُ كُلُوا۟ مِنَ ٱلطَّيِّبَٰتِ وَٱعْمَلُوا۟ صَٰلِحًا ۖ
إِنِّى بِمَا تَعْمَلُونَ عَلِيمٌ ﴿٥١﴾

52. Tanna waa Umaddiinii (Diinta) umad (Diin) kaliya anna waxaan ahay Eebihiin ee iga Dhawrsada.

وَإِنَّ هَٰذِهِۦٓ أُمَّتُكُمْ أُمَّةً وَٰحِدَةً وَأَنَا۠ رَبُّكُمْ
فَٱتَّقُونِ ﴿٥٢﴾

53. Waxayse u kala Goosteen Amarkooda Dhexdooda Kooxo,Xisbi kastana waxa Agtooda ah yey ku Faraxsanyihiin.

فَتَقَطَّعُوٓا۟ أَمْرَهُم بَيْنَهُمْ زُبُرًا ۖ كُلُّ حِزْبٍۭ بِمَا لَدَيْهِمْ
فَرِحُونَ ﴿٥٣﴾

54. ee Isagaga Tag Halmaanshahooda Dhexdiisa Tan iyo Muddo.

فَذَرْهُمْ فِى غَمْرَتِهِمْ حَتَّىٰ حِينٍ ﴿٥٤﴾

55. ma waxay u Malayn waxaannu Siin oo Xoolo iyo Caruur ah.

أَيَحْسَبُونَ أَنَّمَا نُمِدُّهُم بِهِۦ مِن مَّالٍ وَبَنِينَ ﴿٥٥﴾

56. Inaanu u soo Hormarinay Khayraad wax ma Oga.

نُسَارِعُ لَهُمْ فِى ٱلْخَيْرَٰتِ ۚ بَل لَّا يَشْعُرُونَ ﴿٥٦﴾

57. kuwa uun Ka Cabsada Eebahood ka Yaabid.

إِنَّ ٱلَّذِينَ هُم مِّنْ خَشْيَةِ رَبِّهِم مُّشْفِقُونَ ﴿٥٧﴾

58. kuwa uun Aayaadka Eebahood Rumeeya.

وَٱلَّذِينَ هُم بِـَٔايَٰتِ رَبِّهِمۡ يُؤۡمِنُونَ ٥٨

59. kuwa uun Eebahood aan la Wadaajinin.

وَٱلَّذِينَ هُم بِرَبِّهِمۡ لَا يُشۡرِكُونَ ٥٩

60. kuwa Bixin waxa la Siiyay Iyadooy ka Cabsan Quluubtoodu inay Xagga Eebe u Noqon.

وَٱلَّذِينَ يُؤۡتُونَ مَآ ءَاتَواْ وَّقُلُوبُهُمۡ وَجِلَةٌ
أَنَّهُمۡ إِلَىٰ رَبِّهِمۡ رَٰجِعُونَ ٦٠

61. Kuwaasaa u deg degi Khayraadka una Hormarinay.

أُوْلَٰٓئِكَ يُسَٰرِعُونَ فِي ٱلۡخَيۡرَٰتِ وَهُمۡ لَهَا سَٰبِقُونَ ٦١

Eebe wuxuu Faray Nabiyada Inay Cunaan Xalaasha Wanaagna Falaan, wayna Fuliyeen wixii la Faray, Tan kale Xaqu waa mid'Eebana waa Mid kaliya'mana Haboona in la kala Tago ama lays Khilaafo, mana aha Xoolaha iyo Caruurta la Siin Gaalada Khayr loo soo Dedejiyey, ee kuwa Eebe ka Yaaba, ee Rumeeya Aayaadkiisa een u Shariig yeelin, ee wax Bixiya iyagoo ka Cabsan Inay Eebe u Noqon Kuwaasaa Khayrka loo soo Dedejin'una hor mara.Caa'isha Eebe ha ka Raalli Noqdee, waxay warsatay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) in kuwa Cabsan Ay Yihiin: kuwa Xada, Sinaysta, oo Khamro Cabba, wuxuuna yidhi : Ma aha Kuwaas, ee waa kuwa Tukada, Sooma oo Zadaqaysta, Haddana Cabsan (Imaam Axmed). Al-Mu'minuun (51-61).

---

62. kuma Mashaqayno Naf waxayna karin,Agtanadana waxaa ah Kitaab ku Hadli Xaq, lamana Dulmiyo Iyagana.

وَلَا نُكَلِّفُ نَفۡسًا إِلَّا وُسۡعَهَاۖ وَلَدَيۡنَا كِتَٰبٞ
يَنطِقُ بِٱلۡحَقِّ وَهُمۡ لَا يُظۡلَمُونَ ٦٢

63. waxayse kaga Sugantahay Quluubtoodu Halmaansho Xagga Kaas,waxayna Leeyihiin Camallo Kaas ka Duwan (oo Xun) oy iyagu u Camal Fali.

بَلۡ قُلُوبُهُمۡ فِي غَمۡرَةٖ مِّنۡ هَٰذَا وَلَهُمۡ أَعۡمَٰلٞ مِّن دُونِ ذَٰلِكَ
هُمۡ لَهَا عَٰمِلُونَ ٦٣

64. Markaanse ku Qabanno Kuwooda Nicmaysan Cadaab Markaasay Qaylyaan.

حَتَّىٰٓ إِذَآ أَخَذۡنَا مُتۡرَفِيهِم بِٱلۡعَذَابِ إِذَا هُمۡ يَجۡـَٔرُونَ ٦٤

65. (Waxaana la Dhihi) ha Qaylyina Maanta Idinku Xagganaga Laydiin kama Gargaaree.

لَا تَجۡـَٔرُواْ ٱلۡيَوۡمَۖ إِنَّكُم مِّنَّا لَا تُنصَرُونَ ٦٥

66. Waxay ahayd Aayaadkeygii Tii lagu Akhriyo Korkiinna waxaadse ahaydeen kuwa Cidhibtiinna Dib ugu noqda (Xaqa Diida).

قَدۡ كَانَتۡ ءَايَٰتِي تُتۡلَىٰ عَلَيۡكُمۡ فَكُنتُمۡ عَلَىٰٓ أَعۡقَٰبِكُمۡ
تَنكِصُونَ ٦٦

67. Idinkoo isku Kibrin Quraanka (ama Kacbada iyo Nabiga) Cawaysimina idinkoo Hadal Xun.

مُسۡتَكۡبِرِينَ بِهِۦ سَٰمِرٗا تَهۡجُرُونَ ٦٧

68. Miyeyna Fiirinin Quraanka, mise waxaa u Yimid Waxaan U imaanin Aabayaalkoodii hore.

أَفَلَمْ يَدَّبَّرُوا الْقَوْلَ أَمْ جَاءَهُم مَّا لَمْ يَأْتِ
آبَاءَهُمُ الْأَوَّلِينَ ﴿٦٨﴾

69. Mise waxayna Aqoonin Rasuulkooda oo ay Diidi.

أَمْ لَمْ يَعْرِفُوا رَسُولَهُمْ فَهُمْ لَهُ مُنكِرُونَ ﴿٦٩﴾

70. Mise waxay Dhihi waa Waalanyahay, wuxuuse Ula Yimid Xaq Badankoodse Xaqay Nici.

أَمْ يَقُولُونَ بِهِ جِنَّةٌ ۚ بَلْ جَاءَهُم بِالْحَقِّ
وَأَكْثَرُهُمْ لِلْحَقِّ كَارِهُونَ ﴿٧٠﴾

Aayadahanna wuxuu Eebe ku Sheegay inuusan Cidna'ku Mashaqayn waxayna karin, Eeba Agtiisana yahay Kitaab Xaq ku hadli'Cid la Dulminna ayna jirin, Gaaladuse way Halmaansanyihiin Xaalkaas, waxayna leeyihiin Shaqooyin kale, markase kuwooda Raaxaysan Kado Lagu qabto markaasay Eebe u Qaylyaan, mase Habboona inay Qaylyaan'Illeen horay Xaqa u diideene, una Gaaloobeene, Isla wayni iyo Kibirna ku Darsadeene, Miyeynase Fiirinin Quraanka, mise waxaa u Yimid waxaan u Imaan Aabayaalkoodii Hore, Miyeynase Aqoonin Rasuulkooda oo Saasay ku Diidi, Mise Waalli bay ku Sheegi, Dhabtuse waa inuu Xaq ula Yimid'iyana ay Xaqa Diidi. Jacfar iyo Abuu sufyaana waa kuwii u Caddeeyey Najaashi iyo Hiriqle inay Yaqaanaan Nabiga Runtiisa, Ammaanadiisa iyo Nasabkiisaba. Taasina waxay ku Tusin in Cidda Xaqa u Yeedhi tahay mid lagu Yaqaan Sharaf iyo Amaano. Al-Mu'minuun (62-70).

---

71. Hadduu Raaco Xaqu Hawadooda waxaa Fasaadi Lahaa Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa u Dhaxeeya, waxaanse Siinay Quraanka wayse ka Jeedsan quraanka.

وَلَوِ اتَّبَعَ الْحَقُّ أَهْوَاءَهُمْ لَفَسَدَتِ السَّمَاوَاتُ
وَالْأَرْضُ وَمَن فِيهِنَّ ۚ بَلْ أَتَيْنَاهُم بِذِكْرِهِمْ
فَهُمْ عَن ذِكْرِهِم مُّعْرِضُونَ ﴿٧١﴾

72. Mise waxaad warsan Kharaj (u Juuro) Ajirka Eebahaabaa Khayr Roon, waana kan u Khayr Badan Arzaaqe.

أَمْ تَسْأَلُهُمْ خَرْجًا فَخَرَاجُ رَبِّكَ خَيْرٌ ۖ
وَهُوَ خَيْرُ الرَّازِقِينَ ﴿٧٢﴾

73. Adiguna waxaad ugu Yeedhi Jid Toosan.

وَإِنَّكَ لَتَدْعُوهُمْ إِلَىٰ صِرَاطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٧٣﴾

74. Kuwa aan Rumeyn Aakhirona Jidka way ka Iilan.

وَإِنَّ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ عَنِ الصِّرَاطِ
لَنَاكِبُونَ ﴿٧٤﴾

75. Haddaan u Naxariisanno oon ka Faydno waxa haya oo Dhib ah waxay ku Madax Taagi Xumaantooda iyagoo ku Indho la'.

۞ وَلَوْ رَحِمْنَاهُمْ وَكَشَفْنَا مَا بِهِم مِّن ضُرٍّ لَّلَجُّوا
فِي طُغْيَانِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿٧٥﴾

76. Waxaannu ku Qabanay Cadaab umana ayan Hogaansamin «Dulloobin» Eebahood umana Khushuucin.

وَلَقَدْ أَخَذْنَاهُم بِالْعَذَابِ فَمَا اسْتَكَانُوا لِرَبِّهِمْ
وَمَا يَتَضَرَّعُونَ ﴿٧٦﴾

77. Markaan ku Furro Korkooda Cadaab Daran markaasay Quustaan.

حَتَّىٰٓ إِذَا فَتَحۡنَا عَلَيۡهِم بَابٗا ذَا عَذَابٖ شَدِيدٍ
إِذَا هُمۡ فِيهِ مُبۡلِسُونَ ٧٧

Quraanka iyo Xaqa Eebaa soo Dejiyey, mana raacayo Hawadooda iyo Siday Rabaan ee wuxuu ku Socon Jidka Toosan ee Habboon, haddii kale waxaa Fasaadi Cirka, Dhulka iyo waxa ku Dhex sugan, Wuxuuna Eebe soo Dejiyey Quraan Sharaf leh oy Gaaladuna ka Jeedsan, Nabiguna wax Ujuura ah ma warsado, Illeen Ajriga Eebaa Khayr Roone, wuxuuse Nabigu ugu Yeedhi Jidka Toosan, kuwaan Rumayn Aakhirana Jidka way ka Leexdaan, hadduu Eebe u Naxariisto oo ka Faydo Dhibna waxay ku Sii Madax Taagaan Xumaanta, Eebana wuu Imtixaamaa mase u Khushuucaan inta ay ka Arkaan Albaab Cadaab Daran oy Markaas Quustaan'Saasuuna Quraanku iyo Nabigu ugu Yeedhi Xaqa iyo Jidka Toosan'Dadka Qaarkiina u Diidi. siduu Nabigu Yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Xadiith Macnihiisu yahay: Waxaan Idin hayaa Guntiga oo Dabka Idin ka Celin'ldinkuna isku Tuuraysaan Waxayna u Dhawdahay inaan idin sii Daayo, waxaana layga Celin Doonaa Dad markaan Dhaho Eebow waa umadayda yaa la Dhihi ma Ogid waxay Sameeyeen Gadaashaa, Dib bay U noqdeen, (Gaaloobeen) waana taas Dib u noqoshada Dhabta ah. Al-Mu'minuun (71-77).

---

78. Eebe waa kan idiin Yeelay Maqalka, iyo Araga iyo Quluubta wax Yar baadna ku Shugriyeysaan (Eebe).

وَهُوَ ٱلَّذِيٓ أَنشَأَ لَكُمُ ٱلسَّمۡعَ وَٱلۡأَبۡصَٰرَ
وَٱلۡأَفۡـِٔدَةَۚ قَلِيلٗا مَّا تَشۡكُرُونَ ٧٨

79. Eebe waa Kan idinka Abuuray Dhulka Xagiisaana laydiin soo Celina.

وَهُوَ ٱلَّذِي ذَرَأَكُمۡ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَإِلَيۡهِ تُحۡشَرُونَ ٧٩

80. Eebe waa Kan wax Nooleeya,waxna Dila wuxuuna Leeyahay Iskhilaafka (Kala Duwanaanta) Habeenka iyo Maalinta ee Miyeydaan Wax kasayn.

وَهُوَ ٱلَّذِي يُحۡيِۦ وَيُمِيتُ وَلَهُ ٱخۡتِلَٰفُ
ٱلَّيۡلِ وَٱلنَّهَارِۚ أَفَلَا تَعۡقِلُونَ ٨٠

81. Waxayse Dheheen wax la mid ah waxay Dhaheen kuwii hore (Gaaladii).

بَلۡ قَالُواْ مِثۡلَ مَا قَالَ ٱلۡأَوَّلُونَ ٨١

82. Waxay Dheheen Ma Markaan Dhimanno oon Noqonno Carro iyo Lafo Miyaa Anaga nala soo Bixin.

قَالُوٓاْ أَءِذَا مِتۡنَا وَكُنَّا تُرَابٗا وَعِظَٰمًا أَءِنَّا
لَمَبۡعُوثُونَ ٨٢

83. Waa Naloo Yaboohay Aabayaalkanno kan (Soo Bixinta) horay mana aha kani waxaaan warkii hore ahayn.

لَقَدۡ وُعِدۡنَا نَحۡنُ وَءَابَآؤُنَا هَٰذَا مِن قَبۡلُ إِنۡ هَٰذَآ
إِلَّآ أَسَٰطِيرُ ٱلۡأَوَّلِينَ ٨٣

84. Waxaad Dhahdaa yaa leh Dhulka iyo waxa ku sugan haddaad wax Ogtihiin.

قُل لِّمَنِ ٱلۡأَرۡضُ وَمَن فِيهَآ إِن كُنتُمۡ
تَعۡلَمُونَ ٨٤

85. Waxay Odhan Eebe, waxaad Dhahdaa Miyeydaan wax Xusuusanayn.

سَيَقُولُونَ لِلَّهِۚ قُلۡ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ٨٥

86. Dheh waayo Eebaha Samooyinka Todobada ah iyo Eebaha Carshiga Wayn.

قُلْ مَن رَّبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ ٱلسَّبْعِ وَرَبُّ ٱلْعَرْشِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٨٦﴾

87. Waxay Odhan Eebe, Dheh Miyeydaan Dhawrsanayn.

سَيَقُولُونَ لِلَّهِ ۚ قُلْ أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿٨٧﴾

88. Dheh Yey yaddiisa* ku Jirtaa Xukunka wax kasta, oo wax Magan Galiya, isna aan wax laga Magan galinayn, Haddaad wax Ogtihiin.

قُلْ مَنۢ بِيَدِهِۦ مَلَكُوتُ كُلِّ شَىْءٍ وَهُوَ يُجِيرُ وَلَا يُجَارُ عَلَيْهِ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٨٨﴾

89. Waxay Odhan Eebe, Dheh Xaggee Laydiin Sixri.

سَيَقُولُونَ لِلَّهِ ۚ قُلْ فَأَنَّىٰ تُسْحَرُونَ ﴿٨٩﴾

90. Waxaanse Siinay Xaq waana Beenaalayaal.

بَلْ أَتَيْنَٰهُم بِٱلْحَقِّ وَإِنَّهُمْ لَكَٰذِبُونَ ﴿٩٠﴾

**Eebaa Dadka ugu Nicmeeyey Maqalka, Aragga, Caqliga iyo Nicmooyinka kale si ay ugu Mahdiyaan, Wanaagana ugu Dhaqmaan, Isagaana Abuura, oo Dila oo Noolayn, wax walbana Awoodiisa ku Jiraa, Dadkana soo Kulmin, Xukunka Dhulka, Cirka, Carshiga, wax kasta iyo Magan Galintaba isagaa leh, wax Dhibi ama wax u Tara ama Magan galinna ma Jiro, Sidaasayna Waajib u Tahay in si Dhab ah loo Caabudo looguna Dhaqmo Sharcigiisa iyo quraankiisa. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu Yidhi: Xaalka Eebe waa ka wayn yahay Sidaas'Carshigiisu wuxuu ku Yahay Sidaas, wuxuu Ishaaray Gacantiisa sida Qubad. Al-Mu'minuun (78-90).**

*** gacantiisa (dib u eegaha).**

---

91. Ma yeelan Eebe Ilmo,mana aha Miciisa Ilaah (kale) Illeen markaas wuu la Tagi lahaa Ilaah walba wuxuu Abuuray,wuxuuna ka Kormari lahaa (Adkaan lahaa) Qaarkood Qaar, waxaa ka Nasahan Eebe waxay ku Tilmaami.

مَا ٱتَّخَذَ ٱللَّهُ مِن وَلَدٍ وَمَا كَانَ مَعَهُۥ مِنْ إِلَٰهٍ ۚ إِذًا لَّذَهَبَ كُلُّ إِلَٰهٍۭ بِمَا خَلَقَ وَلَعَلَا بَعْضُهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ ۚ سُبْحَٰنَ ٱللَّهِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿٩١﴾

92. Waa Ogaha waxa Maqan iyo waxa Jooga,wuuna ka Sarreeyaa waxay la Wadaajin.

عَٰلِمِ ٱلْغَيْبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ فَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٩٢﴾

93. Waxaad Dhahdaa Eebow Haddaad i Tusiso waxa Looyaboohay.

قُل رَّبِّ إِمَّا تُرِيَنِّى مَا يُوعَدُونَ ﴿٩٣﴾

94. Eebow hayga Yeelin Qoomka Daalimiinta ah.

رَبِّ فَلَا تَجْعَلْنِى فِى ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٩٤﴾

95. Annaguna inaan ku Tusinno waxaan u Yaboohnay waan Karraa.

وَإِنَّا عَلَىٰٓ أَن نُّرِيَكَ مَا نَعِدُهُمْ لَقَٰدِرُونَ ﴿٩٥﴾

96. ee Raaci (Dhaafso) Tan Wanaagsan Midda Xun Anagaa og Waxay Tilmaamiye (Sheegi).

ٱدْفَعْ بِٱلَّتِى هِىَ أَحْسَنُ ٱلسَّيِّئَةَ ۚ نَحْنُ أَعْلَمُ بِمَا يَصِفُونَ ﴿٩٦﴾

وَقُل رَّبِّ أَعُوذُ بِكَ مِنْ هَمَزَٰتِ ٱلشَّيَٰطِينِ ﴿٩٧﴾

97. Waxaadna Dhahdaa Eebow waxaan kaa Magangalay Waswaaska Shayaadiinta.

وَأَعُوذُ بِكَ رَبِّ أَن يَحْضُرُونِ ﴿٩٨﴾

98. Waxaana kaa Magan Gali Eebow inay ii Yimaadaan Shayaadiintu.

حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَ أَحَدَهُمُ ٱلْمَوْتُ قَالَ رَبِّ ٱرْجِعُونِ ﴿٩٩﴾

99. Markuu u Yimaaddo Midkood (Gaalada) Mawdku wuxuu Dhihi Eebow I celiya.

لَعَلِّىٓ أَعْمَلُ صَٰلِحًا فِيمَا تَرَكْتُ ۚ كَلَّآ ۚ إِنَّهَا كَلِمَةٌ
هُوَ قَآئِلُهَا ۖ وَمِن وَرَآئِهِم بَرْزَخٌ إِلَىٰ يَوْمِ يُبْعَثُونَ ﴿١٠٠﴾

100. Waxaan u Dhawahay inaan Falo Wanaage waxaan ka Tagay, saas ma aha ee waa Hadal uu iska Yidhi Gadaashoodana waxaa ah Barzakh,tan iyo Maalinta la Soo Bixin.

Eebe Ilmo ma leh Umana Baahna, Ilaah kalena lama Jiro oo Mid Walba wuxuu Qaadan lahaa wuxuu Abuuray, Midbaana midka kale ka Sarreyn lahaa, waana ka Nazahanyahay Eebe waxaas, wax walbana waa Ogyahay, Eebana waa karaa Ciqaabtooda, waana in Eebe la Warsado inuusan Daalimiinta kala mid Dhigin Siduu Nabiga Faray, Xumaantana waa in Wanaag Lagu Badalaa, Shaydaankana Eebe laga Magan Galo, si aan marka la Dhiman Loo Calaa Calin Celinna loo Warsanin Si Camal Fiican loo Falo. Al-Mu'minuun (91-100).

---

فَإِذَا نُفِخَ فِى ٱلصُّورِ فَلَآ أَنسَابَ بَيْنَهُمْ يَوْمَئِذٍ
وَلَا يَتَسَآءَلُونَ ﴿١٠١﴾

101. Marka la Afuufo Suurka ma Jiro Nasab Dhexdooda Maalintaas,waxna isma Warsadaan.

فَمَن ثَقُلَتْ مَوَٰزِينُهُۥ فَأُو۟لَٰٓئِكَ
هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿١٠٢﴾

102. Ciddayse Cuslaato Miisaankiisu (Wanaagga) kuwaasi waa kuwa uun Liibaanay.

وَمَنْ خَفَّتْ مَوَٰزِينُهُۥ فَأُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ خَسِرُوٓا۟
أَنفُسَهُمْ فِى جَهَنَّمَ خَٰلِدُونَ ﴿١٠٣﴾

103. Ciddayse Fududaato Miisaankiisu kuwaasi waa kuwa Khasaariyey Naftooda Jahannamayna ku Waari.

تَلْفَحُ وُجُوهَهُمُ ٱلنَّارُ وَهُمْ فِيهَا كَٰلِحُونَ ﴿١٠٤﴾

104. Waxaana Gubi Wajigooda Naarta iyagoo Waji diiran.

أَلَمْ تَكُنْ ءَايَٰتِى تُتْلَىٰ عَلَيْكُمْ
فَكُنتُم بِهَا تُكَذِّبُونَ ﴿١٠٥﴾

105. (Waxaa lagu Dhihi) Miyeyna ahayn Aayaadkanagu kuwa lagu Akhriyo Korkiinna ood Beenin Jirteen.

قَالُوا۟ رَبَّنَا غَلَبَتْ عَلَيْنَا شِقْوَتُنَا
وَكُنَّا قَوْمًا ضَآلِّينَ ﴿١٠٦﴾

106. Waxay Dhahaan Eebow waxaa naga Adkaatay Xumaantanadii,waxaana ahayn Qaar Dhunsan.

رَبَّنَآ أَخْرِجْنَا مِنْهَا فَإِنْ عُدْنَا فَإِنَّا ظَٰلِمُونَ ﴿١٠٧﴾

107. Eebow naga Bixi Xaggeeda Haddaan u Noqonana Anagaa Daalimiin ah.

108. Wuxuu Dhahaa Eebe ku Fogaada Dhexdeeda Idinkoo (Dullaysan) hana Ila Hadlina.

قَالَ ٱخْسَـُٔوا۟ فِيهَا وَلَا تُكَلِّمُونِ ﴿١٠٨﴾

109. Waxaa Jirtay in Koox ka mid ah Addoomadayda ay Dhahaan Eebow waan Rumaynay Xaqa ee noo Dhaaf noona Naxariiso Adaa Naxariiste u Khayr Roone.

إِنَّهُۥ كَانَ فَرِيقٌ مِّنْ عِبَادِى يَقُولُونَ رَبَّنَآ
ءَامَنَّا فَٱغْفِرْ لَنَا وَٱرْحَمْنَا وَأَنتَ خَيْرُ ٱلرَّٰحِمِينَ ﴿١٠٩﴾

110. Waxaadse ka Yeelateen Jees jees intay idinka Halmaansiiyaan Xuskayga ood kuna Qoslayseen.

فَٱتَّخَذْتُمُوهُمْ سِخْرِيًّا حَتَّىٰٓ أَنسَوْكُمْ ذِكْرِى
وَكُنتُم مِّنْهُمْ تَضْحَكُونَ ﴿١١٠﴾

111. Waan ka Abaal marinay Maanta Samirkoodii Dartiis, iyaga unbaana Liibaanay.

إِنِّى جَزَيْتُهُمُ ٱلْيَوْمَ بِمَا صَبَرُوٓا۟ أَنَّهُمْ
هُمُ ٱلْفَآئِزُونَ ﴿١١١﴾

Qiyaamada, Miisaanka, Janada, Naarta iyo Abaal marintaba wax badan yuu Quraanku soo Cel Celiyey'waxaase loo Baahan yahay Waano Qaadasho.
Waxbana uma Taro Gaalo Calaacal Maalintaa mar Hadday Beenin Jireen Quraanka'kuna Jees jeesi Jireen Mu'miniinta, kuna Qosli Jireen, Kuwaasoo Wanaag lagu Abaal Marin Maalintaas Liibaanina. Waxayna Caddayn Aayaddu Inaan Nasab iyo Qaraabo wax tarayn Qiyaamada ee Wanaag iyo Xaq Rumayn uun wax Tari iyo toosni Dhab ah. Al-Mu'minuun (101-111).

---

112. Wuxuuna Dhihi Eebe imisa Sanaad ku Nagaateen Dhulka.

قَٰلَ كَمْ لَبِثْتُمْ فِى ٱلْأَرْضِ عَدَدَ سِنِينَ ﴿١١٢﴾

113. Waxayna Odhan waxaan ku Nagaanay Maalin ama Maalin Qaarkeed, warsada kuwa wax tiriya «Malaa'igta».

قَالُوا۟ لَبِثْنَا يَوْمًا أَوْ بَعْضَ يَوْمٍ فَسْـَٔلِ ٱلْعَآدِّينَ ﴿١١٣﴾

114. Wuxuu Yidhi Maydaan Nagaanin wax Yar Mooyee Haddaad wax Ogtihiin.

قَٰلَ إِن لَّبِثْتُمْ إِلَّا قَلِيلًا ۖ لَّوْ أَنَّكُمْ
كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿١١٤﴾

115. ma Waxaad u Malayseen inaan Idiin Abuuray Ciyaar oon idinka Xagganaga loo soo Celinayn.

أَفَحَسِبْتُمْ أَنَّمَا خَلَقْنَٰكُمْ عَبَثًا وَأَنَّكُمْ
إِلَيْنَا لَا تُرْجَعُونَ ﴿١١٥﴾

116. Waxaa Sarreeya Eebaha Xaakimka Xaqa ah Ilaah aan isaga ahayna ma jiro Waana Eebaha Carshiga Sharafta leh.

فَتَعَٰلَى ٱللَّهُ ٱلْمَلِكُ ٱلْحَقُّ ۖ لَآ إِلَٰهَ
إِلَّا هُوَ رَبُّ ٱلْعَرْشِ ٱلْكَرِيمِ ﴿١١٦﴾

117. Ciddii Caabudda Eebe la Jirkiisa Ilaah kale oon Xujo lahayn Xisaabtiisu waa uun Eebe Agtiisa, mana Liibaanto Gaalo.

وَمَن يَدْعُ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ لَا بُرْهَٰنَ لَهُۥ بِهِۦ فَإِنَّمَا
حِسَابُهُۥ عِندَ رَبِّهِۦٓ ۚ إِنَّهُۥ لَا يُفْلِحُ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿١١٧﴾

118. Waxaad Dhahdaa Eebow Dhaaf oo Naxariiso adaa Naxariiste u Khayr Roone.

وَقُل رَّبِّ ٱغْفِرْ وَٱرْحَمْ وَأَنتَ خَيْرُ ٱلرَّٰحِمِينَ ﴿١١٨﴾

**Gaalada Xisaabtu way ka Lumi Qiyaamada, mana Gartaan intay Adduunka ku Noolaayeen, waxayse Sheegi inay Maalin ama Maalin Badhkeed ku Noolaayeen Iyagooy la Yaraatay dhibka Dartiis, Wax yar bayse ku Noolaayeen hadday Garan, Dadkana Ciyaar looma Abuurin, Waxaana Sarreeya Eebaha Xaakimka Xaqa ah, ee Carshiga Sharafta leh iska leh, Ciddii Caabuda oo Xumaan iyo Gaalimo ku Raacda wax kale Eebe la Jirkiisa Eebaa Xisaabin'Gaalana ma Liibaanaan, Dambi Dhaaf iyo Naxariisna Eebaa leh oo hanta. Al-Mu'minuun (112-118).**

# Suurat An-Nuur

# سُورَةُ النُّورِ

Magaca Eebe Yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Tani) waa Suurad aan Soo Dejinay oo Faralnay (wax ku Caddaynay) kuna soo Dejinay Dhexdeeda Aayaad Cad Cad inaad wax Xusuusataan (waano qaada Taan)

سُورَةٌ أَنزَلْنَٰهَا وَفَرَضْنَٰهَا وَأَنزَلْنَا فِيهَآ ءَايَٰتٍۭ بَيِّنَٰتٍ لَّعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ ﴿١﴾

2. Zaaniyadda (Haween) iyo Zaaniga (Ragga) Garaaca mid kastoo ka mid ah Boqol Garaac yeyna Idiin Qabanin Xagooda Naxariis Diinta Eebe Dhexdeeda Haddaad Tihiin kuwa Rumeeyey Eebe iyo Maalinta Dambe (Qiyaamada) hana Joogo Garaacooda Koox ka Mid ah Mu'miniinta.

ٱلزَّانِيَةُ وَٱلزَّانِى فَٱجْلِدُوا۟ كُلَّ وَٰحِدٍ مِّنْهُمَا مِا۟ئَةَ جَلْدَةٍ وَلَا تَأْخُذْكُم بِهِمَا رَأْفَةٌ فِى دِينِ ٱللَّهِ إِن كُنتُمْ تُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ وَلْيَشْهَدْ عَذَابَهُمَا طَآئِفَةٌ مِّنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٢﴾

3. Zaani ma Guursado waxaan Zaaniyad ahayn, ama Gaal, Zaaniyadna ma Guursato waxaan Zaani ahayn ama Gaal, waana laga Reebay Arrintaas Mu'miniinta.

ٱلزَّانِى لَا يَنكِحُ إِلَّا زَانِيَةً أَوْ مُشْرِكَةً وَٱلزَّانِيَةُ لَا يَنكِحُهَآ إِلَّا زَانٍ أَوْ مُشْرِكٌ وَحُرِّمَ ذَٰلِكَ عَلَى ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٣﴾

4. Kuwa (Zino) ku Gana (Sheega) Haweenka Dhawrsoon oon Afar Marag ah keenin Garaaca Siddeetan Garaacood,hana ka Aqbalina Marag Waligood,kuwaasina waa uun Faasiqiin.

وَٱلَّذِينَ يَرْمُونَ ٱلْمُحْصَنَٰتِ ثُمَّ لَمْ يَأْتُوا۟ بِأَرْبَعَةِ شُهَدَآءَ فَٱجْلِدُوهُمْ ثَمَٰنِينَ جَلْدَةً وَلَا تَقْبَلُوا۟ لَهُمْ شَهَٰدَةً أَبَدًا وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْفَٰسِقُونَ ﴿٤﴾